

Aftida Codka Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait

Dhawaan codbixiyaasha Australiya ayaa la waydiin doonaa inay u codeeyaan aftida. Aftida waxa lagu waydiin doonaa in Dastuurka ay kujiraan Codka Baarlamaanka ee Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait. Baarlamaanku waa hay'adda u dejisa sharciyada Australia.

Waa Maxay Codka loo jeedinaayo Baarlamaanku?

Codku waa nidaam Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait loogala talinayo Dawlada iyo waxyaabaha ku saabsan shuruucda iyaga saamaynaya. Ku qorista Codka Dastuurka waxay la macno tahay in Codku uu yeelan doono door joogto ah siinta tallada Dowladda ee ku saabsan arrimaha saameeya Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait. Codka Baarlamaanka wuxuu fursad u noqon doonaa Dadyowgaa Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait si loo aqoonsado dastuuriyan iyo in dhaqankooda la qiro lana xuso.

Maxay Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait u waydiisanayaan Codka loo jeedinayo Baarlamaanka?

Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait waxay codsanayeen in dawladu aqoonsato ku dhawaad 100 sano. Dadyowgaa Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait waxay si fiican u yaqaan bulshooyinkooda iyo dhaqankooda. Waxay yaqaanaan xalalka ugu wanagsan si ay ula kulmaan caqabadaha soo wajaha bulshooyinkooda kuwaas oo abuurka kara cadaalad ka wanaagsan, waayo-aragnimo dheeraad ah oo ay u siman yihiin Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowgaa u Dhashay Jasiiradda Torres Strait.

Muxuu qaban doonaa Codka loo jeedinayo Baarlamaanka?

Codku waxa uu dhagaysan doonaa talada Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ee ku saabsan arrimaha saameeya noloshooda, si ay dawladdu u gaadho go'aamo wanagsan oo saamaynaya Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait.

Yaa ku metali doona codka loo jeedinayo Baarlamaanka?

Codku waxa uu noqon doonaa koox ka mid ah Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait oo ka kala yimid gobol kasta iyo dhul kasta oo ay ku jiraan meelaha fog-fog. Wakiilada waxaa dooran doona Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ee goobahooda deegaanka.

Ma lagala tashaday Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ee Codka loo jeedinayo Baarlamaanka?

Kumanaan kun Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ayaa bixiyay talo ku saabsan sababta loogu baahan yahay Codka iyo sida ay tahay inuu shaqeeyo sanado badan. In ka badan 80% Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ayaa taageray codka loo jeedinayo Baarlamaanka.

Maxay ka dhaheen khabarada sharcigu?

Qareenada Dastuuriga ah oo ay ku jiraan kuwa u dooda Dowladda Federaalka ayaa sheegay in Codku uu yahay mid sharci ah, isla markaana uu ka dhigi doono nidaamkeena dowladnimo mid wanagsan.

Codku sharci ma samayn karaa?

Maya. Codku awood uma yeelan doono inuu sharci sameeyo. Waxay kaliya ku siin doontaa talo ku saabsan arrimaha saameeya Dadyowga Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadyowga u Dhashay Jasiiradda Torres Strait.

Su'aal nooc ee ah ayaa Aftida Codka Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ay weydiin doonaan?

“Sharciga la soo jeediyay: in la beddelo dastuurka si loo aqoonsado Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ee Ustareeliya iyadoo la dhisayo Codka Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait. Ma oggolaatay wax ka beddelkan la soo jeediyay?

Sideen ugu codeynayaa Aftida?

Aftidu waa sida doorashooyin oo kale. Waxa lagu siin doonaa warqad cod-bixineed oo ay su'aasha sare ku qoran tahay waxaadna u baahan doontaa inaad ku qorto 'YES' (HAA) ama 'NO' (MAYA) oo Ingiriisi ah si codkaaga loo tiriyo. Haddii aad qorto 'YES' waxay la macno tahay inaad oggolaatay Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait inay cod ku yeeshaan arrimaha sida tooska ah u saameeya.

Maxaa dhacaya haddii dadka intiisa badan ay YES (HAA) ku codeeyaan?

Haddi dadka intiisa badan ay Yes ugu codeeyaan Codka, Dawladdu waxay markaas kala tashan doontaa Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait si ay u dhamaystiraan naqshadaynta oo ay u ansixiyaan sharciyo si loo dhaqan geliyo Codka.

Maxaa dhacaya haddii dadka intiisa badan ay u codeeyaan NO (MAYA)?

Haddii badi dadka ay u codeeyaan 'No', waxba isma beddelayaan. Arrimaha ay wajahayaan Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait way sii socon doonaan. Codbixinta 'No' waxay la macno tahay inaad ku codayso MayaCodka, ma jiro beddel kale oo aad ku taageerto Dadka Ustareeliyaanka Dhaladka ah iyo Dadka u Dhashay Jasiiradda Torres Strait ee aftidan loo qabanayay.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

**macluumaad
dheeraad ah**

www.lwb.org.au

